

Sharciga 28 Janaayo 1964, lamba. 6

Waxka bedelka Sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14 ee Nidaamka Dowladda iyo Aasaasidd shirkadda gaarka ah ee Madbacada Dawladda "Stamperia di Stato".

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu qiray ansixinta Golaha Shacbiga;

Wuxuu Sharciyay

Sharciga soo socdo:

Qod. 1

Hawlaha kale ee Wasaaradda Warfaafinta

Wax ka beddelka qodobka 9aad ee sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14, iyo marka lagu daro awoodaheeda oo ku tilmaaman qodobka 15 ee sharciga aan kor ku soo xusnay, laga bilaabo 1 Janaayo 1964 Wasaaradda Warfaafintu waxay sidoo kale ka shaqeysaa arrimaha khuseeya Madbacadda Qaranka.

Qod. 2

Aasaasidda Wakaalad gaar ah "Madbacada Qaranka"

Laga bilaabo isla taariikhdaas waxaa la aasaasay Wakaaladda gaar ah ee lagu magacaabo «Mabacada Qaranka», oo ka hawlgeleyso dhulka qaranka, fadhigeeduna yahay magaalada Muqdisho, ayaa laga dhex dhisay maamulka Wasaaradda Warfaafinta.

Warshad kasta oo kale oo dawladeed oo ka jirta gayiga Jamhuuriyadda, laga bilaabo isla taariikhda 1 Janaayo 1964, waxa lagu daray mashiin, qalab iyo kayd u gaar ah, oo lagu daray madbacada aan soo sheegnay.

Xeerarka la xiriira Madbacadda Qaranka waxaa lagu soo saari doonaa iyadoo lagu saleynayo qod. 23 ee Sharciga 3 Juun 1962, lamba. 14.

Qod. 3

Tirtirid

Xeer kasta oo liddi ku ah ama ka soo horjeedo sharcigan, waa la tirtiray.

Qod. 4

Dhaqan Galay

Sharcigan waxa uu dhaqan gelayaa taariikhda lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah. Sharcigan waxaa lagu dari doonaa Ururinta Rasmiga ah ee Sharciyada iyo Xeerarka waxaana lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah.

Cid kasta oo mas'uul ka ah waxa ku waajib ah in ay ilaaliso oo ay u ilaaliso sida Xeerka Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 28 Jannaayo 1964.

Aden Abdule Osman

Wasiirka Koowaad

Abdirashid Ali Shermarke